

**Xeer – Sharci lamba. 5 ee 29 Setember ee 1967**

**Xadeynta Saacadah Howlaha Adeega Cuntada Diyaar ah iyo Cabitaanka ee Bisha Ramadan**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la arkay 63 ee Dastuurka;  
Kadib markii la garowsaday in loo baahan yahay in la nidaamiyo howlahda adeega cuntada diyaarka inta lagu jiro bisha Ramadaan;  
Kadib markii la dhegestay soo jeedinta Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta;  
Kadib markii la tixgeliyey aragtida Golaha Wasiirka.

**WAXAA LA SOO SAARAY**

**Qod. 1**

Bisha Ramadaan, subaxa ilaa iyo maqribkii waxaa la faray in la xiro goobaha guud sida maqaayadaha, baraarka, goobaha shaahiga ama goob kasto oo lagu iibiyo cunto diyaar iyo cabitaanka.

**Qod. 2**

1. Ciddi ku xad gudubta amarrada ku qoran qodobka sare ku xusan wuxuu muteysan doono xarig ilaa 6 bilood iyo ganaax ilaa Sh.So. 1,000;
2. Cidda ku qoran shatiga ee goobta oo lagu muteystay ciqaabta ku qoran faqradda sare ku xusan wuxuu haddii mar kale lagu qabto ciqaabta halkaas ku qoran iyo in la hakiyo shattiga ilaa muddo 2 sano laga bilaabo maalintii xukunku ku dhacay.

**Qod. 3**

Dekretadaani waxay hirgeli doonta isla maalinta la soo saaray waxaana la horgeyn doona Golaha Qaranka si loogu beddelo sharci sida ku cad qod. 63 ee Dastuurka;

Muqdisho, 29 Nofember 1967.

**Abdirashiid Ali Shermarke**

Rai'sul Wasaaraha

**Mohamed Haji Ibrahim Egal**

Wasiirka Caddalada iyo Arrimaha Diinta

**Aden Shire Jama**